

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
<b>FAAFINTA RASMIIGA AH</b>		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE		النشرة الرسمية لجمهورية صومالiland
<b>XAFIISKA GARYAQQAANKA GUUD EE QARANKA</b> <b>JSL, HARGEYSA</b> <i>E-mail: Garyaqankaaguud@gmail.com</i>		
Sanadka: 2aad	Cadadka: 2aad ee February	Taariikh: 02/03/2013
QIIMAH CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAH FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		
<b>TUSMADA CADADKA</b>		
<u>QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA</u> <u>IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</u>		
1) Xeerka Aasaaska Komishanka Maamul Wanaaga, Xeer Lr.58/2012		250
2) Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Xeer Lr. 61/2013		266
<u>QAYBTA LABAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA</u> <u>IYO DIKREETODYINKA</u> <u>MADAXWEYNHA:</u>		
3) M AGACAABID, <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0284/022013</u>		272
4) M AGACAABID, <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0285/022013</u>		273
5) M AGACAABID, <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0286/022013</u>		274
		275

6)	<b>BIXIN DERAO,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0287/022013</u>	276
7)	<b>BEDDEL,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0288/022013</u>	278
8)	<b>BEDDEL,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0289/022013</u>	279
9)	<b>BEDDEL,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0290/022013</u>	280
10)	<b>BEDDEL,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0291/022013</u>	281
11)	<b>BEDDEL,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0292/022013</u>	282
12)	<b>BEDDEL,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0293/022013</u>	284
13)	<b>BEDDEL,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0294/022013</u>	285
14)	<b>M AGACAABID,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0295/022013</u>	286
15)	<b>M AGACAABID,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0296/022013</u>	287
16)	<b>M AGACAABID,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0297/022013</u>	288
17)	<b>M AGACAABID,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0298/022013</u>	289
18)	<b>M AGACAABID,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0299/022013</u>	290
19)	<b>M AGACAABID,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0300/022013</u>	291
20)	<b>M AGACAABID,</b> <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0302/022013</u>	292
21)	<b>XIL-Ka QAADIS;</b> <i>February 04, 2013</i>	293
22)	<b>XIL-Ka QAADIS;</b>	

*February 04, 2013*

**DAYBTA SADEXAAD:** DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA,  
AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA  
WASIIIRADA, IWM  
*Sooma Bixin*

**DAYBTA AFRAAD:** AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

- |  |     |
|--|-----|
| 23) BAAFIN RACFAANLE;<br>Maxkammadda Racfaanka<br>Gobolka M/Jeex,<br>MRH/DMRL/140/2012 | 294 |
| 24) BAAFIN DACWEYSANE;<br>Maxkammadda Degmada<br>Hargeysa, MDH/DML/187/13              | 295 |
| 25) AMAR XAYIRAAD GURI; Maxkamadda<br>Racfaanka Gobolka M/Jeex,<br>MRH/RML/142/2012.   | 296 |
| 26) BAAFIN XUKUN; Maxkamadda<br>Gobolka M/Jeex, MGH/DFL/246/12                         | 298 |

**DAYBTA SHANAAD:** OGEYSIISYADA  
*Sooma bixin*

**QAYBTA KOWAAD:**  
**XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1581/022013

DATE .....03/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0301/022013**

**Dhaqan-galka Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga  
Xeer Lr. 58/2012**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-20/585/2013 ee ku taariikheysan 15/01/2013 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Hay'adda Komishanka Maamul Wanaaga Xeer Lr. 58/2012;

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga Qaranka Xeer Lr. 58/2012 ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Ref Cw/G/KF-20/585/2013

Date: 15/01/2013

Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga  
Xeer Lr.58/2012

**GOLAH A WAKILADA JSL**

- Markuu Arkey:** • Qodobka 39<sup>aad</sup>, 77<sup>aad</sup> iyo Qodobka 113<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland.
- Markuu Darsay:** Xeerka Komishanka Maamul-Wananga ee ay soo gudbiyeen Golaha Wasirada Jamhuuriyada Soomaaliland.
- Isagoo Ogsoon:** Ahmiyada ay leedaday in la abuurol hab-dhaqan maamul wanaagsan iyo ummad ka nadif ah dhamaan noociyada mustuqa, lana soo cesho karaamada iyo siiyaddada (Integrity and Sovereignty of the State) si loo helo qaranimo taam ah iyo umad xalaal mirrad ah.
- Markuu Tixgaliyey:** Talaadii Golaha Guurtida iyo dhamaan daneeyayaasha kale ee uu khuseeyo xeerkani .
- Markuu Ku Qancey:** In baahi loo qabo abuurida Komishan madax banaan oo ka horlagaa lana dagaalama musuq-musaqa iyo karti darada hay'adhaa dawlada, isla markaana kula xisaabtama тооинта маамулка oo horseed u noqda taaba-gelinta, iyo dib-u-habeynta nidaamka maamul wanaag. Isla markaana sahasha in si hufan looga midho dhaliyo horu-marka iyo hiisiga Qaraniimadda Jamhuuriyada Soomaaliland ee ku cad Qorshaha Horumarinta Qaranka "National Development Plan".
- Markuu Aqoonsadey:** Danta iyo maslaxadda qaranka Jamhuuriyada Soomaaliland si loo gaadbo in ay lagama maarmaan tahey in la helo komishan dejiya heerka habximo ee laga rabo hay'ad kasta oo dawladda ka mid ah, kuna daba-gala fulitaankiisa.

**MARKUU U CODEEYHEY:**

Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga Xeer Lr. 58/2012 Kal-fadhibji 20<sup>aad</sup> fadhibisii 10<sup>aad</sup> taariikhduuna ku suntanayd 07/01/2013 oo ay goob joog ahaayeen (44) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.

**WUXUU**

Cod aqlabiyadd ah oo afartan iyo kaw mudane (**41 cod**) oo gacan taag ah ku Ansixiyay Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga Xeer Lr. 58/2012, halka laba (2) mudane ka aamuseen , cid diidaynā aanay jirin **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caaddada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

*Crisaaq Siciid Ayaanle  
Xoghayaha, Guud ee Golaha Wakiilada*

  


*Baashe Maxamed Faarax -  
Kismaha Gudoomiyaha Golaha  
Wakiilada ahna Gidgeenka Iaad*

## GOLAHA WAKIILADA JSL

- Markuu Arkey:** Qodobadda 53aad, 77aad iyo qodobka 113<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland.
- Markuu Arkey:** Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga ee ay soo gudbiyeen Golaha Wasiirada JSL
- Markuu Dersey:** Ahmiyada ay leedahay in la abuuro hab-dhaqan maamul wanaagsan iyo ummad ka nadiif ah dhamaan noocyada musuqa, lana soo cesho karaamada iyo siyaadada (integrity and sovereignty of the state) qaranimo iyo umad xalaal miirad ah.
- Markuu Tixgaliyey:** Talooyinkii Golaha Guurtida iyo dhamaan Talooyinkii kale ee daneeyayaasha uu khuseeyo xeerkani.
- Markuu Ku Qancay:** In baahi loo qabo abuurida Komishan madax banaan oo ka hortaga lana dagaalama musuq-maasuqa iyo karti darada hay'adaha dawlada, isla markaana kula xisaabtama toosinta maamulka kaas oo horseed u noqda toosinta, taaba-gelinta, iyo dib-u-habeynta maamul wanaaga, hufnaanta, banyaalnimada si looga midho dhasho horu-marka iyo hiigsiga Qaranka Jamhuuriyada Soomaaliland ee ku cad Qorshaha Horumarinta Qaranka "National Development Plan".

**Markuu Aqoonaadey:**

Danta iyo maslaxada qaranka Jamhuuriyada Soomaaliland si loo gaadho in ay lagama maarmaan tahey in la helo komishan dejiya heerka habximo ee laga rabo hay'ad kasta oo dawlada ka mid ah, kuna daba-gala fulitaankiisa.

Waxa Uu Soo Saarey:

**Xeerka Aasaaska Komishanka Maamul-Wanaaga Xeer**

Lr: 58/2012

**TUSMADDA XEERKA**

<b>QAYBTA KOWAAD: TILMAAMAHAGUUD.....</b>	5
Qoddobka 1aad: Erey Bixinta Xeerka.....	5
Qoddobka 2aad: Magac-dhawga Xeerka.....	5
Qoddobka 3aad: Fasiraadda Xeerka .....	5
Fairaadda Xeerka.....	5
Qoddobka 4aad Komishanka Maamul Wanaaga .....	5
<b>QAYBTA 2AAD: AWOODAHA IYO SHURUUDAHA KOMISHANKA.....</b>	6
Qoddobka 5aad: Shuruucda Xubnaha Xafiiska Komishanka.....	6
Qoddobka 6aad: Shaqada Iyo Waajibaadka.....	6
Qoddobka 7aad: Magaacabista iyo Xilka qaadista Xubnaha Komishanka .....	7

Qoddobka 8aad: Muddada Xilka Komishanka.....	8
Qoddobka 9aad: Xarunta Komishanka.....	8
Qoddobka10aad: Dhaarta Xubnaha Komishanka.....	9
Qoddobka 11aad: Banaanshaaha Xubinimada Komishanka .....	9
Qoddobka 12aad: Warbixinta Sandeedka Komishanka .....	9
Qdobka 13aad: <b><u>Xilka iyo Waajibaadka Guddomiyaha</u></b> .....	9
Qoddobka 14aad: Xilka iyo Waajibaadka Guddomiye Ku Xigeenka.....	10
Qoddobka 15aad: Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud.....	10
Qdobka 16aad : Mushaharooyinka iyo Gunnoyinka.....	10
Qoddobka 17aad: Baadhista, Xaqijinta iyo Warbixinta la xidhiidha Tibaaxaha Maamul-Xumada iyo wax-is-weydaarinta .....	10
Qoddobka 18aad: Xeerka loo Adeegsanyo Dembiyada MusuqMaasuqa.....	11
Qoddobka 19aad Oogidda Dembiyada Musuqmaasuqa .....	11
Qdobka 20aad: Dhaqan-galka Xeerka.....	11

**QAYBTA KOWAAD**  
**TILMAAMAH GUUD**  
**Qoddobka 1<sup>aad</sup>**  
**Erey Bixinta Xeerka**

**Agaasimaha:** Waxa loola jeeda Agaasimaha Guud ee Komiishanka Maamul-wanaaga Jamhuuriyadda Somaliland oo ah hay'adda uu xeerkani abuurayo;

**Guddoomiyaha:** waxa loola Jeedaa Guddoomiyaha Komiishanka Maamul Wanaaga;

**Hanti-Dhawre:** waxa loola jeedaa Hantidhawrka Guud ee Qaranka;

**Komiishanka:** waxa loola jeedaa xubnaha komiishanka Maamul-wanaaga masuulna ka ah dhamaan awoodaha uu xeerkani tilmaamayo;

**Xeerka:** Waxa loola Jeeda Xeerka Aasaaska Komishanka Maamul – wanaaga.

**Qoddobka 2<sup>aad</sup>**  
**Magac-dhawqa Xeerka**

Yeerkani waxaa loogu yeedhayaa “**Xeerka asaaska Komiishanka Maamul Wanaaga Xeer Lr: 58/2012**”

**Qoddobka 3<sup>aad</sup>**  
**Fasiraadda Xeerka**

Wixii aanu Yeerkani si cad u qeelin, waxaa loo fasirayaa si waafaqsan shareecada diinta islaamka, Dastuurka dalka iyo xeerkarka kale ee la xidhiidha xeerkani iyo hadii loo baahdo Xeerarka Caalamiga ah.

**Qoddobka 4<sup>aad</sup>**  
**Komiishanka Maamul Wanaaga**

Xeerkan waxa lagu aasaasay Komiishanka Maamul Wanaagga, oo leh shakhsiyad qanuniya (legal personality)

**QAYBTA 2AAD**  
**AWOODAHA IYO SHURUUDAHA KOMISHANKA**

**Qoddobka 5<sup>aad</sup>**  
**Shuruudaha Xubnaha Xafiiska Komiishanka**

Qofka xubinta ka noqonaya Komiishanku:-

1. Waa inuu yahay muwaadin reer Soomaaliland ah.
2. Waa inuu Muslim yahay, asluub wanaagsan bulshada ku dhex leeyahay.
3. Waa in Da'diisu aanay ka yaraan soddon (30) sanadood.
4. Waa inuu waxbarasho heer jaamacadeed haystaa, ama wax u dhigma.
5. Waa inuu lahaadaa waayo aragnimo Todoba (7) sanadood ah, oo la xidhiidha arimaha hogaamineed iyo mid maamulba.
6. Waa in aanu ku dhicin xukun Maxkamaddeed oo kama denbays ah oo lagu muteysan karo ciqaab gaadhaysa 3 sanadood 5-tii sano ee u danbeeyey.
7. Waa inuu ku sifoobay xilkas, Akhlaaq wanaag iyo Dhaqan toosan, yahayna shakhsi leh sifo Dhexdhexaadnimo, Karti, Hufnaan iyo Daacadnimo.

**Qoddobka 6<sup>aad</sup>**  
**Shaqada iyo Waajibaadka**

Shaqada iyo Waajibaadka Komishanka Maamul Wanaaga waa:

1. U madax bannaanaan yahay xil-gudashadiisa, waxaana

- reeban talaabo kasta oo lagaga leexinayo xil-gudashadiisa.
2. Dersidda iyo qiimeynta nidaamka maamul ee Hay'adaha Dawladda iyo ka soo talo bixinta habka lagu toosinayo.
  3. Ku wacyi-gelinta nidaamka toosan Hay'adaha Dawladda.
  4. Kormeeridda hab-sami-u-socodka maamulka.
  5. Baadhista iyo dabagalka galdaloolooyinka maamul.
  6. Hubinta hirgelinta qorshe hawleedyadda Hay'adaha Dawladda.
  7. Soo jeedinta barnaamijiyada lagu horumarinayo maamul wanaagga
  8. Baadhista ku takrifalka awoodda maamul.
  9. Hubinta iyo dabagalka ku dhaqanka saacadaha shaqada, isagoo la kaashanaya Hay'adaha ay khusayso.
  10. U gudbinta Hay'adaha sharciga wixii faldambiyeedda ee ka soo baxa baadhista.

### **Qoddobka 7<sup>aad</sup>**

#### **Magacaabista iyo Xilka qaadista Xubnaha Komishanka**

1. Komishanku waxa uu ka kooban yahay Shan (5) xubnood oo lagu soo xulay shuruudaha ku cad Qoddobka afraad (4<sup>aad</sup>) ee Xeerkan.
2. Xubnaha Komiishanka waxa magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland waxana cod hal dheeriya ku ansixinaya Golaha Wakiilada
3. Xubnaha Komishanka waxaa xilka ka qaadi kara Madaxweynaha JSL.
4. Guddoomiyaha iyo ku-xigeenka guddoomiyaha xubnaha ayaa iska dhex dooranaya, waxaanay ku ansaxayaan cod hal dheer tirade xubnaha komishanka.
5. Komishanku waxa uu yeelanayaan Agaasime guud oo Madaxweynuhu magacaabo, xilkana ka qaadi karo, marku la tashado komishanka.
6. Komishanku waxa uu u shaqaalayn karaa shaqaale si waafaqsan nidaamka shaqaalaynta hay'adda shaqaalaha dawlada, marka uu guddomiyuhu u arko lagama maarmaan gudashada xilka komishanka. Waxa xilka lagaga qaadi karaa

taloobo anshax marineed si waafaqsan xeerka shaqaalaha dawlada.

7. Komishanku wuxuu yeelan karaa guddi la'talineed markii loo baahdo oo tiradeeda iyo mudada ay shaqaynayaanba komishanku go'aaminayo.

### **Qoddobka 8<sup>aad</sup>**

#### **Muddada Xilka Komishanka**

1. Muddada Xilka Komishanka waa (4) Afar sano, oo ka billaabanyasa Maalinta Xilkaas loo dhaariyo.
2. Xubin ama xubno ka mida ah Komishankii hore, Madaxweynuhu Mar-labaad wuu magacaabi karaa isagoo ku Qiimeynaya Wax-qabadkiisa shaqo.

### **Qoddobka 9<sup>aad</sup>**

#### **Xarunta Komiishanka**

Komiishanka waxay xaruntiisu noqonaysaa Hargeisa, caasimada J.S.L, sidoo kale Komishanku waxa uu go'aansan karaa in uu gobolada kale ka furto xafiisyo, iyada oo ku xidhnaan doonta awoodooda dhaqaale iyo baaxadda hawleed.

### **Qoddobka 10<sup>aad</sup>**

#### **Dhaarta Xubnaha Komiishanka**

1. Madaxweynaha ayaa isugu yeedhaya xubnaha Komishanka, muddo 30 cisho gudahood ah marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, fadhibooda ugu horeeyana waxaa si xubin-xubin ah ugu dhaarinaya xubnaha Komishanka Gudoomiyaha Maxkamada Sare.
2. Dhaarta xubnaha Komishanku waxa ay noqonaysaa; "**Waxaan ILAAHAY ugu dhaartay inaan mas'uuliyadda Komishanka**

*u gudan doonno si caddaalad ah oo aanan ugu kala eexan doonin muwaadiniinta Somaliland iyo cid kasta oo shaqo u haysa Qaranka, xafidi doonana sirta Qaranka”.*

3. Xubnaha Komishanku magacaabista ka dib si buuxda ayay u bilaabayaan hawsha xafiiska.

### **Qoddobka 11<sup>aad</sup>**

#### **Bannaanaanshaha Xubnimada Komiishanka**

Xubnimada Komishanku waxay ku bannaanaan kartaa:

1. Xil ka qaadista ku xusan qodobka 7<sup>aad</sup> ee xeerkan.
2. Is-casilaad qoraal ah oo xubantu u gudbiso Madaxweynaha, ogaysiina siiso xubnaha kale ee Komishanka.
3. Geeri ku timaada.
4. Haddii xubinta ay ku cadaato dambi xadhigisu gaadhayo muddo sadex (3) sano ah ama ka badan.
5. Haddii xubantu u gudan kari waydo xilkeeda sababo caafimaad darro awgeed oo ay cadeeyeen guddi dhakhaatiir ah oo ka diiwaangashan wasaarada caafimaadka.
6. Haddii xubantu ka maqnaato afar kulan oo xidhiidha ama 45 cisho gudahood oo is xiga shaqada Komishanka fasax la'aan awgeed.

### **Qoddobka 12<sup>aad</sup>**

#### **Warbixin Sanadeedka Komishanka**

1. Iyada oo ay tixgalinayaan ujeedoyinka Komiishanka ee ku qeexan Qoddobka (5<sup>aad</sup>) ee xeerkan, Komishanku waa inuu Madaxweynaha u soo gudbiyo warbixin dhammaystiran oo khusaysa waxqabadkoodii sannadkaas ugu danbeyna dhammaadka bisha February sannad walba.

### **Qoddobka 13<sup>aad</sup>**

#### **Xilka iyo Waajibaadka Guuddoomiyaha**

|

Guuddoomiyaha oo ah madaxa komishanka wuxuu masuul ka yahay:-

1. Xilgudashada waajibaadka komishanka iyo habsami u adeegsiga awoodaha ku xusan xeerkan.
2. Maamullka guud ee komishanka iyo go'aan ka qaadashada anshaxmarinta shaqaalaha Komiishanka.
3. Waxa uu soo saari karaa wareegtooyin maamuleed si waafaqsan qoddobada maamulka guud, tababaradda, waajibaadka iyo masuuliyadaha xubnaha Komishanka iyo arrimihii kale ee uu u arko lagama maarmaan amma ku haboon maamul wanaagga hawlahaa Komishanka iyo hubinta habsami u socodka hawlahooda.
4. Ku hadalka afka Komishanka, haddii aanu cid kale u igman.
5. Kormeerista, qiimaynta, toosinta shaqada Komiishanka iyo Go'aan qaadashada nidaamka shaqada Komiishanka.
6. Masuuliyada Guud ee ilaalinta iyo fullinta xeerkan.

#### **Qoddobka 14<sup>aad</sup>**

#### **Xilka iyo Waajibaadka Guddomiye ku xigeenka**

1. Ku simida maamulka Komiishanka marka uu maqanyahay Guddomiyuhu.
2. Waxa uu ka caawinaya gudoomiyaha habaynta hawlahaa kala duwan ee shaqo.
3. Gudashada waajibaadka kale ee uu gudoomiyuha u igamaddo.

#### **Qoddobka 15<sup>aad</sup>**

#### **Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud**

Agaasimaha guud;

1. Waxa uu u xil saaranyahay hawl maalmeedka Komiishanka.
2. Waxa uu hoos yimaadaa Gudoomiyaha.
3. Waa madaxa shaqaalaha Komiishanka.
4. Waxa uu fullinaya go'aamada komiishanka.
5. Waxa u si toos ah warbixinta u siinaya Gudoomiyaha komishanka.

## **Qoddobka 16<sup>aad</sup>**

### **Mushahrooyin iyo Gunnooyinka**

Xubnaha Komiishanku waxa ay xaq u leeyihii in ay helaan mushaharooyin iyo gunnooyinka lagama maarmaanka u ah gudashadashada hawshooda.

## **Qodobka 17<sup>aad</sup>**

### **Baadhista, Xaqijinta iyo Warbixinaha la xidhiidha tibaaxaha maamul-xumada iyo wax-is-weydarinta**

1. Komishanku markuu helo war tibaaxaya jiritaanka maamul-xumo ee ka jira hay'add dawladeed ama in mas'uul dawladeed ku kacay wax-is-weydaarin ama ku-takrifal hanti ummadeed ama awood dawladeed, wuxuu ku tallaabsanayaa hubinta sida ay dhab ahaan wax uga jiraan warkaas;
2. Haddii uu Komishanku ku qanco in maamul-xumada, wax-is-weydarinta ama ku-takri-falka hantida ummadeed ama awoodda dawladeed ee la galay ay mudan tahay in cid maxkamad lagu hor-geeyo, wuxuu ku war-gelinayaa Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka si, isagoo raacaya Xeerka Hanti-dhawrka Qaranka, uu baadhis rasmii ah ugu sameeyo arrintaas, tallaabada sharci ee ku habboonna uu uga qaado.
3. Haddii ay Komishanka la noqoto in maamul-xumada, wax-is-weydarinta ama ku-takri-falka hantida ummadeed ama awoodda dawladeed ee uu warkeeda helay aanay gaadhsiisneyn heer cid maxkamad lagu hor-geyn karo, wuxuu saxayaa dhallilaha maamul ee jira iyo khaladaadka dhacay.
4. Hanti-dhawrka Guud ee Qaranku wuxuu Komishanka nuqlu ka siinayaa natijjada baadhista arrin kasta oo uu ku soo war-geliyo Komishanku.
5. Haddii uu Komishanku ku qanci waayo natijjada baadhista ee Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka, wuxuu warbixin uu ku faahfaahinayo sababta uu ugu qanci waayey natijjada baadhista Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka u gudbinayaa Madaxweynaha.

### **Qodobka 18<sup>aad</sup>**

#### **Xeerka loo Adeegsanayo Dembiyada Musuqmaasuqa**

Wax-ka-qabashada fal-dembiyeedyada la xidhiidha musuqmaasuqa waxa ugu mudan in loo adeegsado Xeerka La-dagaallanka Musuqmaasuqa, wixii meel looga waayana waxa loo raacayaa Xeerka Ciqaabta Guud ee Somaliland.

### **Qodobka 19<sup>aad</sup>**

#### **Oogidda Dembiyada Musuqmaasuqa**

Fal-dembiyeedyada musuqmaasuq ee u sugma Hantidhawrka Guud waxa maxkamadaha awoodda u leh ka hor-oogaya Xeer Ilaalinta Guud.

### **Qodobka 20<sup>aad</sup>**

#### **Dhaqan-galka Xeerka**

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka ay golayaasha sharci dajintu ansixiyaan madaxweynuhuna saxeexo.

---

C/risaaq Siciid Ayaanle  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.

---

C/raxmaan Maxamed Cabadilahi (Ciro)  
Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL.

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1598/022013

19/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0281/012013**

Dhaqan-galka Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada  
Xeer Lr. 61/2013

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-20/588/2013 ee ku taariikheysan 16/02/2013 ee ay ku ansixiyeen xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Xeer Lr. 61/2013;

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Xeer Lr. 61/2013 ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

**Axmed Maxamed Silanyo**  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



Ref: Gus/G/KF-20/588/2013

Date: 16/02/2013

Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada  
Xeer Lr.61/2013

**Markuu Arkay**

**Qodobadda** 54aad iyo 14aad oo si cad u qeexaya awooda jidanya takaaliifta ee Golaha Wakiilada iyo in curinta takaaliifta ay lagama maarmaan tahay in uu xeer jideeyo

**Markuu Tixgeliyay:-**

Baahidda weyn ee loo qabo in kor loo qaado heerka amaanka iyo sumcadda Madaarada Somaliland, taas oo dhabadda u xaadhi karta in ay dhaqaalaha Dalka kobciso, isla markaana dhiirigelisa arimaha dalxiiska, maalgashiga shisheeye, iyo ka ganacsiga hawada Somaliland.

**Markuu garwaaqsaday:-**

In ay lagama maarmaan tahay in lays waafajiyoo xeerarka caalamiga ah ee duulista hawada (1944 Chicago Convention) iyo xeerarka dalka ee duulista hawada si loo helo xeer hufan oo si mug leh u eegaya duruufteena tixgalina siinaya xeerarka caalamiga ah, si dhabada loogu xaadho dhismaha **Hay'adda Duulista Hawada Somaliland (Somaliland Civil Aviation Authority)**.

**Markuu Garawsaday:-**

In aanay suurtagal ahayn duruufita hadda in kharashyada kala du-duwan ee ku baxaya adeegga qalabka lagu baadho shandadaha iyo Dadkaba laga dabooli karo Miisaaniyadda Qaranka ee 2013.

**Markuu Dersay:-**

Warbixintii Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada iyo dhamaanba Takaaliifta iyo cashuuraha laga qaado Madaarada Somaliland

**Markuu u Codeyay :**

Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada **Xeer Lr.** 61/2013 **Kal-fadhigii** 20<sup>aad</sup> fadhiisii 24<sup>aad</sup> taariikhduuna ku suntanayd 2/02/2013 oo ay goob joog ahaayeen (50) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha **Golaha Wakiilada**.

### **WUXUU**

Cod aqlabiyadd ah oo afartan iyo lix mudane (**46 cod**) oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada** (Xeer Lr. 61/2013), halka **laba** (2) mudane ka diideen, hal mudanena ka aamusay **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caaddada ah.

### **ALLAA MAHAD LEH**

*[Handwritten signatures]*

Erishaag Siciid Agaante  
Zoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada      Md Bashe Maxamed Farax  
Gudoomiye-ku-xigeenkafaad ee G/Wakiilada

## GOLAHA WAKIILADA JSL

### **Markuu Arkay**

Qodobadda 54aad iyo 14aad oo si cad u qeexaya awooda jidaynta takaaliifta ee Golaha Wakiilada iyo in curinta takaaliifta ay lagama maarmaan tahay in uu xeer jideeyo

### **Markuu Tixgeliyay:-**

Baahidda weyn ee loo qabo in kor loo qaado heerka amaanka iyo sumcadda Madaarada Somaliland, taas oo dhabadda u xaadhi karta in ay dhaqaalahaa Dalka kobciso, isla markaana dhiirigelisa arimaha dalxiiska, maalgashiga shisheeye, iyo ka ganacsiga hawada Somaliland.

### **Markuu garwaqsaday:-**

In ay lagama maarmaan tahay in lays waafajijo xeerarka caalamiga ah ee duulista hawada (1944 Chicago Convention) iyo xeerarka dalka ee duulista hawada si loo helo xeer hufan oo si mug leh u eegaya duruufteena tixgalina siinaya xeerarka caalamiga ah, si dhabada loogu xaadho dhismaha **Hay'adda Duulista Hawada Somaliland (Somaliland Civil Aviation Authority)**.

### **Markuu Garawsaday: -**

In aanay suurtagal ahayn duruufta hadda in kharashyada kala du-duwan ee ku baxaya adeegga qalabka lagu baadho shandadaha iyo Dadkaba laga dabooli karo

Miisaaniyadda Qaranka ee 2013.

**Markuu Dersay:-**

Warbixintii Guddida Dhaqaalaha  
ee Golaha Wakilada iyo  
dhamaanba Takaaliifta iyo  
cashuuraha laga qaado  
Madaarada Somaliland

**Wuxuu**

**Ansixiyay Xeerka Takaaliifta Amniga Madaaradda JSL  
(Xeer Lr 61/2013)**

**Qodobka 1<sup>aad</sup>**  
**Eray Bixinta**

Hadaan si kale loo sheegin waxaa loo jeedaa macnaha erayada Xeerka dhexdiisa sidan:

**Xeer:** - Xeer waxaa loola jeedaa Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada.

**Takaaliif:** - Waxa loola jeedaa waajibaadka maaliyadeed ee xeerkani jideeyey.

**Wasiir:** - **Waxa** loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Duulista Hawada

**Socoto:** - Waxa uu xeerkani u aqoonsan yahay ruux kasta oo ka dhoofaaya Madaarada Dalka Jsl.

**Qodobka 2<sup>aad</sup>**  
**Magaca Xeerka**

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada JSL.

**Qodobka 3<sup>aad</sup>**  
**Xadka Dabaqaada Xeerka**

Xeerkan waxaa lagu dabaqayaa socotada ka dhoofaysa Madaarada Dalka.

**Qodka 4<sup>aad</sup>**  
**Takaaliif**

Waxaa ku waajib ah dhoofe kasta oo sita tigidh diyaaradeed, isla markaana leh kursi iyo miisaan u gaar ah in uu bixiyo takaaliif lacageed oo dhan (\$10) toban dollar.

### **Qodobka 5<sup>aad</sup>**

#### **Gacan Ku Haynta Adeegyada iyo Ururinta Takaaliifta**

1. Gacan ku haynta Ururinta Takaaliifta iyo adeega amniga Madaarada ee la xidhiidha qalabka lagu baadho shandadaha, Shaqaalahi iyo socotada waxaa ka mas'uul ah Xukuumadda, waxaanay u igman kartaa cidii ay u garato ee ku habboon.
2. Wuxuu la dhisayaa **Hay'adda Duulista Hawada** (Somaliland Civil Aviation Authority, SCAA) oo u xilsaaran maamulka iyo maaryanta duulimaadyada hawada Somaliland, taasi oo la wareegi doonta adeegyada Madaarada iyo ururinta Takaaliifta Xeerku jideeyey.

### **Qodobka 6<sup>aad</sup>**

#### **Ururinta iyo Qaab-xisaabeedka Takaaliifta.**

1. Ururinta iyo qaab-xisaabeedka takaaliifta, waxaa loo raacayaa xeerarka maaliyada ee Dalka.
2. Habka bixinta kharashaadka waxaa jaangoynaya Wasaaradda Maaliyadda, Wasaarada Duulista iyo Hawada iyo shirkada gacanta ku haya.

### **Qodobka 7<sup>aad</sup>**

#### **Awoodaha Hanta Dhawraha Guud ee Qaranka**

Iyada oo aan waxba loo dhimayn awoodaha Hanti-dhawraha Guud ee ku xusan Xeerka hanti-dhawrka Guud iyo kuwa kale ee xeerarka Dalku jideeyeen, Hanti-dhawraha Guud wuxuu awood u leeyahay baadhista iyo dabagalka takaaliiftan.

### **Qodobka 8<sup>aad</sup>**

#### **Xeer-nidaamiyaha Xeerkana**

Wasiirka ayaa awood u leh inuu soo saaro Xeer-nidaamiye aan ka hor imanayn Xeerkana.

**Qodobka 9<sup>aad</sup>**  
**Dhaqan-galka Xeerka.**

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, Madaxweynuhuna saxeexo, isla markaana lagu baahiyoo faafinta rasmiga ah.

---

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

---

**Baashe Maxamed Faarax**  
**Gud Ku-xigeenka 1<sup>aad</sup> ee**  
**Golaha Wakiilada JSL**

**QAYBTA LABAAD:**  
**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1553/022013

DATE... 01/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0284/022013**

**Magacaabid  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo in la dardar-geliyo hawlahaa Ciidanka Qaranka;
- Markuu Tixgeliyey: La-tashiga Madaxda ay arrintani khusayso;
- Markuu Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Axmed Cawaale Yuusuf (Libaax), laga bilaabo taariikhda Xeerkana uu ahaado Abbaanduulaha Labaad ee Ciidanka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

  
**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1554/022013

DATE .... 01/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0285/022013**

**Magacaabid**  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, ee xarafka (d) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Ahmiyadda ay Ciidanka Booliiska u leeyihiin Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagadda Taliye Ku-xigeenka Labaad ee Ciidanka Booliska JSL;
- Markuu Tixgeliyey: La-tashiga Madaxda ay arrintani khusayso;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Daahir Cali Wacays, laga bilaabo taariikhda Xeerkan uu ahaado Taliye Ku-xigeenka Labaad ee Ciidanka Booliska JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1555/022013

DATE.... 01/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0286/022013**

**Magacaabid  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, ee xarafka (d) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Ahmiyadda ay Ciidanka Asluubtu u leeyihiin Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagadda Taliye Ku-xigeenka Labaad ee Ciidanka Asluubta JSL;
- Markuu Tixgeliyey: La-tashiga Madaxda ay arrintani khusayso;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Cali Cumar Axmed, laga bilaabo taariikhda Xeerkanaa uu ahaado Taliye Ku-xigeenka Labaad ee Ciidanka Asluubta JSL, ahna La Taliyaha Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1561/022013

DATE .... 01/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0287/022013**

**Bixin Derajo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkey:** Qodobka 90aad, Faqradiisa 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;
- Markuu Arkey:** In ay lagama maarmaan tahay in madaxad Ciidamadu yeeshaan Derajo Ciidan oo ay ku Hogaamiyaan Ciidamada;
- Markuu Tix-raacay:** Magacaabidii Guddida Hirgelinta Mashruuca Derajo-Bixinta iyo Tallo-Bixinta;
- Markuu Tixgeliyey:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga JSL ee ay Sumadeedu tahay WGDH/XW/13 ee ku taariikhaysan 01/02/2013 ee Derajo Bixinta Madaxda Ciidamada;
- Markuu Garwaaqsaday:** Dedaalka dheeraadka ah ee ay bixiyeen hogaminta Ciidamada iyo sugida amniga Qaranka;

**Markuu Ku-qancay:**

In bixinta derajada Ciidamadu ay kor u  
qaadi doonto Milgaha iyo Sharafta  
Ciidamideena iyo Haybadda  
Dawladnimo;

Wuxuu Xeeriyey

In Madaxda Ciidamada Qaranka ee hoos ku xusan la siiyo Derajooyinka  
Ciidan ee soo socda:

Ciidanka Qaranka JSL

- |   |                |
|---|----------------|
| 1. Taliyaha Ciidanka Qaranka JSL, ismaaciil Shaqale Cismaan:          | Sarreeye Gaas  |
| 2. Abbaanduulaaha 1aad ee Ciidanka Qaranka JSL, Cabdilaahi X.Jaamac:  | Sarreeye Guuto |
| 3. Abbaanduulaaha 2aad ee Ciidanka Qaranka JSL, Axmed Cawaale Yuusuf: | Sarreeye Guuto |
| 4. Madaxa Hogaanka Hawlgelinta Taliska Guud, Maxamed Aaden Saqadhi:   | Gashaanle Sare |

Ciidanka Booliska JSL

- |  |                 |
|--|-----------------|
| 1. Taliyaa Ciidanka Booliska JSL, Cabdillahi Fadal liman:                        | Sarreeye Guuto  |
| 2. Taliye ku-Xigeenka 1aad ee Ciidanka Booliska JSL, Cabdiraxmaan Liibaan Axmed: | Sarreeye Guuto  |
| 3. Taliye Ku-Xigeenka 2aad ee Ciidanka Asluubta JSL, Cali Cumar Axmed:           | Gashaanle Sarre |

Ciidanka Asluubta JSL

- |  |                 |
|--|-----------------|
| 1. Taliyaha Ciidanka Asluubta JSL, Maxamed Xuseen Faarax:              | Sarreeye Guuto  |
| 2. Taliye Ku-Xigeenka 1aad ee Ciidanka Asluubta JSL, Xasan Cali Cawad: | Gashaanle Sare  |
| 3. Taliye Ku-Xigeenka 2aad ee Ciidanka Asluubta JSL, Cali Cumar Axmed: | Gashaanle Sarre |

Ciidanka Illaalada Xeebaa JSL:

- |   |                 |
|---|-----------------|
| 1. Taliyaha Ciidanka Illaalada Xeebaha JSL, Axmed Aw Cismaan Cabdi: | Sarreeye Guuto  |
| 2. Taliye Ku-Xigeenka Illaalada Xeebaha JSL, Cabdi Xirsi Ducaale:   | Gashaanle Sarre |

Allaa Mahad Leh,

Dr. Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1562/022013

DATE....04/02/13

## **XEER MADAXWEYNE Lr:0288/022013**

### **Beddel Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihii dhismaha Qaranka;
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo in isku-beddel lagu sameeyo Gudoomiyeyaasha Gobollada Dalka;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;
- Markuu Ku Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

### **Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Axmed Cumar X. Cabdilaahi (Xamarji), laga bilaabo taariikhda manta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Togdheer ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**



## **THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1563/022013

DATE.... 04/02/13

### **XEER MADAXWEYNE Lr:0289/022013**

#### **Beddel Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihiiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Garwaaqsaday: In baahi loo qabo in isku-beddel lagu sameeyo Gudoomiyeyaasha Gobollada Dalka si loo horumariyo hanaanka Dawladnimo;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;
- Markuu Ku Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Maxamed Maxamuud Cali, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Maroodi-jeex ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



### **THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1564/022013

DATE.... 04/02/13

### **XEER MADAXWEYNE Lr.0290/022013**

#### **Beddel Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- |                      |  |
|----------------------|--|
| Markuu Arkay:        | Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;  |
| Markuu Arkay:        | Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;  |
| Markuu Tixgeliyay:   | Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihiiin dhismaha Qaranka;  |
| Markuu Garwaaqsaday: | In baahi loo qabo in isku-beddel lagu sameeyo Gudoomiyeyaasha Gobollada Dalka si loo horumariyo hanaanka Dawladnimo; |

Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;

Markuu Ku Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

### Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Jamaal Xuseen Hurre, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Oodweyne ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



### THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-1565/022013

DATE....04/02/13

XEER MADAXWEYNE Lr:0291/022013

### **Beddel** **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihii dhismaha Qaranka;
- Markuu Garwaaqsaday: In baahi loo qabo in isku-beddil lagu sameeyo Gudoomiyeyaasha Gobollada Dalka si loo horumariyo hanaanka Dawladnimo;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;
- Markuu Ku Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

### Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Yuusuf Ibraahim Geedi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Gabiley ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



### **THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1566/022013

DATE....04/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0292/022013**  
**Beddel**

## **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihii dhismaha Qaranka;
- Markuu Garwaaqсадай: In baahi loo qabo in isku-beddel lagu sameeyo Gudoomiyeyaasha Gobollada Dalka si loo horumariyo hanaanka Dawladnimo;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;
- Markuu Ku Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

### Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Axmed Cali Nuur, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Saraar ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



### THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-1567/022013

DATE....04/02/13

**Beddel**  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihin dhismaha Qaranka;
- Markuu Garwaaqsaday: In baahi loo qabo in isku-beddel lagu sameeyo Gudoomiyeyaasha Gobollada Dalka si loo horumariyo hanaanka Dawladnimo;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;
- Markuu Ku Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Ibraahim X. Xasan Cali, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Hawd ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1568/022013

DATE.... 04/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0294/022013**

**Beddel**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihiiin dhismaha Qaranka;

Markuu Garwaqaqday: In baahi loo qabo in isku-beddel lagu sameeyo Gudoomiyeyaasha Gobollada Dalka si loo horumariyo hanaanka Dawladnimo;

Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;  
Markuu Ku Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Cabdoo Axmed Aayer, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Hawd ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1569/022013

DATE.... 04/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0295/022013**

**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihiiin dhismaha Qaranka;

Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagadan;

Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;

Markuu Ku Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Maxamed Faarax Aden, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Sool ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1570/022013

DATE.... 04/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0296/022013**

**Magacaabid  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihiiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagadan;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;
- Markuu Ku Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Cabdilaahi Faarax Maydhane, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Selel ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1571/022013

DATE.... 04/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0297/022013**

**Magacaabid  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihii dhismaha Qaranka;
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagadan;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay hawshani khusayso;
- Markuu Ku Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Axmed Muxumed Geele, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Sanaag ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

**Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1572/022013

DATE.... 04/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0298/022013**

**Magacaabid  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihii Dalka iyo Dhismaha Qaranka;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan Karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Aden Diriye Cigaal, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Ganacsiga ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1573/022013

DATE.... 04/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0299/022013**

**Magacaabid  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihii Dalka iyo Dhismaha Qaranka;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu ku Qancay: In uu hanan Karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Nuur Cismaan Guuleed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1574/022013

DATE....04/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0300/022013**

**Magacaabid  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Hay'adda Xidhiidhinta Raashinku u leeyahay Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Mareeyaha Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka ee WFP (Food Coordination Agency) ee JSL;

Markuu La Tashaday: Madaxda ay khusayso;  
Markuu ku Qancay: In uu hanan, aqoon iyo Kartina u leeyahay jagadan xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Yuusuf Cismaan Garas, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka (FCA) ee JSL, waxanay Hay'addu hoos iman doonta Wasaaradda Dib-u-dejinta JSL.

Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-1577/022013

DATE.... 04/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr:0302/022013**

**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Wakaaladda Horumarinta Wadooyinku (RDA) u leedahay Dhismaha iyo Horumarinta Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagadan Maareeyaha Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan Karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Xasan Cali Cismaan, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Wakaaladda Horumarinta Wadooyinka (Road Development Authority) ee JSL.

Allaa Mahad Leh,  
Axmed Maxamed Silanyo  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249/1-1578/022013

DATE....04/02/13

Ku: Mudane, Axmed Xaddi Sidci  
Gudoomiyihii Hore ee Gobolka Awdal      Borame

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha      Hargeysa

Ujeedo:      Xil ka-qaadis

Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo, wakhtigan xaadirka ahna waxa aan gartay in xilkii Gudoomiyaha Gobolka Awdal aan kaa qaado una magacaabo masuul cusub oo xilkaai guta.

Sidaa darted, waxaan ku faraya in xilkaa aad ku wareejiso Mudane, Cabdoo Axmed Aaayir oo aan u soo magacaabay in uu noqdo Gudoomiyaha Gobolka Awdal.

Waxaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto la faraya in uu labada masuul u kala wareejijo xilka Gudoomiyaha Gobolka Awdal.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**



**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249/1-1579/022013

DATE....04/02/13

Ku: Mudane, Maxamed Daahir Axmed  
Mareeyihii Hore ee Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka  
(FCA) Hargeysa

Og: Wasiirka Wasaaradda Dib-u-dejinta Hargeysa

Ujeedo: Xil ka-qaadis

Xilalka Qaranka ayez dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo, wakhtigan xaadirka ahna waxa aan gartay in xilkii Mareeyaha Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka aan kaa qaado una magacaabo masuul cusub oo xilkaai guta.

Sidaa darted, waxaan ku faraya in xilkaa aad ku wareejiso Mudane, Yuusuf Cismaan Garas oo aan u soo magacaabay in uu noqdo Mareeyaha Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka.

Waxaa Wasiirka Wasaaradda Dib-u-dejinta oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto la faraya in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Mareeyaha Hay'adda Xidhiidhinta Raashinka (FCA).

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# **QAYBTA AFRAAD: AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

**Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Maroodi jeex**

MRH/DMRL/140/2012

04/02/2013

KU: - Radio Hargeisa

KU: - Wargeesyada Madaxa Banaan IYO kuwa Dawladdaba

Og: - Xafiiska Garyaqanka Guud Ee Qaranka JSL

## **Ujeedo: - Baafin Racfaanle: - maxamed maxamuud cige**

Maxkamada Racfaanka Gobolka Maroodi jeex waxay baafinaysaa racfaanlaха magaciisu sare ku xusan yahay inuu maxkamadda rafcaanka horteeda ku yimaado muddo 30 cisho ah gudaheed ah oo ka bilaabmaya maalinta idaacada iyo wargeesyada madaxa banaan iyo kuwa dawladdaba laga baahiyo.

Haddii uu ku iman waayana waxaa laga qaadi doonaa tallabo sharciga waafaqsan oo la xidhiidha arintiisa, iyadoo loo cuskaday Qoddobka 101 XHM.

Allaa Mahad Leh

Sh.Ismaaciil muxumed Ibraahim

Garsooraha Maxkamadda Racfaanka Gobolka maroodi jeex

=Hargaysa=

Cabdi Qani maxamed c/laahi

Kaaliyaha Maxkamadda racfaanka gobolka maroodi jeex



## MAXKAMADDA DEGMADDA HARGEYSA

---

MGH/DML/187/13

Hargeysa.

Ku: Idaacada Radio Hargeysa

05/02/13

Ku: Dhamaan Warbaahinta Madax Banaan Ee dalka J.Sland

Uj: - Baafin dacwaysane.

(Ismaaciil Yusuuf Maxamuud)

Maxkamadda Degmada Hargeysa waxay baafinaysa Dacweysanaha Magaciisu sare ku xusan yahay in uu ku yimaado Maxkamada horteeda mudo dhan (30) cisho gudahood oo ka bilaabanta Maamilnta laga baahiyio war baahinta dalka kaasi oo ay u taalo maxkamada dacwad madaniya oo uu dhinac ka yahay, hadaba waxa dacweysanaha lagu amrayaa in uu maxkamada ku yimaado mudada loo qabtay haduu ku iman waayo dacweysanuhu waxa ay maxkamadu ka qaadi doonta talaaba sharciga waafaqsan oo la xidhiidha dacwadiisa

Maxkamadu waxay u cuskatay baafinta Qod.121, 108, X, H, M

ALLAA MAHAD LEH.

C/raxmaan Maxamed Mawliid

Guddomiyaha Maxkamada Degmadda Hargeysa

Kaaliye: Khadar Xasan Suldaan



## **Maxkamadda Racfaanka Gobolka maroodi jeex**

MRH/RML/142/2012

Taar: - 06/02/2013

KU: -Taliyaha Booliska Saldhiga Dhexe Ee Hargaysa

KU: -Radio Hargaysa

KU: -Dhamaan Wargaysyada Madax Banaan iyo Kuwa Dawlada

OG: - Taliyaha Qaybta Galbeedka Hargaysa

OG: - Garyagaanka Guud ee Qaranka JSL

OG: - Racfaanlay: -Foosiya Daahir Bootaan

Qareen: - C/xakiin Jaamac Caydiid

OG: - Racfaansane: - Ismaacij Maxamed Warsame

Qareen: - Cumar Abjib Cumar

## Ujeeddo: - Amar xayiraad quri

## Maxkamadda racfaanka qobolka maroodi jeex

Markay Aragtay: -

galdacwadeedka racfaanka madaniga  
ah ee Lr MRH/RML/142/12 kana  
dhexeeye dhinacayada sare ku xusan

**Markay araqtay:** -

in gurigan ay kataagan tahay dacwad  
la iskuna hayo ku tagrifalkiisa ayna  
hooban tahay mar haddi la iskuhayo  
in intaav dacwadu ka socoto labada

dhinaca midna kutagrifali Karin inta ay  
dacwadu ka dhamanayso  
maxkamadda racfaank

Markayaragtay: - qodobada 292, 293, 294 XHM, waxay  
xayiraadsaartay guriga jihoyinkiiisu  
yihiiin sidan hoos ku xusan

Galbeed.....Dhisme

Bari..... waddo uu kasoo  
horjeeda fooqa ilma Cumar xaashi

Waqooyi.....Waddo uu kasoo horjeedo  
oomar

Koonfur..... Maqsinka Qaadka

Sidaas darted waxa la amrayaa taliyaha saldhiga dhexe ee hargaysa  
iyo taliyaha qaybta galbeedka hargaysa in gurigaas laga bilaabo manta  
la iibin Karin lana rahmi Karin la kirayn Karin sifo kalena loo isticmaali  
Karin ilaa amar dembe kasoo baxayo maxkamadda racfaanka gobolka  
maroodi jeex, Hadaba waa in aad sida ugu dhakhsaha badan u soo  
qufushaan furayaashana aad horkeentaan isla maxkamadda racfaanka

Allaa mahad leh

SH. Ismaaciil muxumed ibraahim

Garsooraha Maxkamadda Racfaanka Gobolka maroodi jeex

=Hargaysa=

Cabdi Qani maxamed c/Laahi

Kaaliyaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka maroodi jeex



## Maxkamadda Racfaanka Gobolka maroodi jeex

---

MGH/DFL/246/12

Hargeysa, 09/02/13

Ku: Xafiiska Garyaqanka Guud ee Dawlada JSL

Hargeysa

Ku: Radiyow Hargeysa

Hargeysa

Ku: Wargeesyada Madaxa Banaan ee JSL

Hargeysa

Ujeeddo: Baafin Xukun.

Maxakmadda Gobolka Hargeysa iyadoo Habraacaysa Qodobada: 81, 311, X.H.M, waxay Baafinaysaa Xukunka Maxakmadda Rafcaanka ee Sumadiisu tahay MRH/D-MRL/61/06, ee 21/06/2012, kaas oo ka dhixeyey Dhinacayada kala ah:

1. Rafcaanle: Xasan Cabdi Xaad. Iyo
2. Rafacaansaneyaal: Axmed Xuseen Ismaaciil  
Caasha Axmed Ismaaciil

C/Raxmaan C/Laahi Xasan

Maxamuud Ismaaciil Faarax.

Dhulkaas oo ay u Xukuntay Rafcaanle: Xasan Cabdi Xaad, Dhul Cabir Dhan 48X36 MTR, oo ku yaal Degmada Ib/Kodbuur xaafada Jig-jiga Yar Qaybta (J)lehna fayl lanbar 11231 jihoo yinkuisuna kala yihii : Galbeed==Dhisme, W/B/K==Waddo. Kana Xukuntay Rafcaansanyaal:

1. Axmed Xuseen Ismaaciil
2. Caasha Axmed Ismaaciil
3. C/Raxmaan C/Laahi Xasan
4. Maxamuud Ismaaciil Faarax.

Sidaaa darteed Baafintan waxay ka bilaabmaysaa maraca lagu faafiyo faafinta rasmiga ah ee Dawlada laguna qoro wargeesyada Madaxa Banaan iyo Radiyow Hargaysa.

ALLAA      MAHAD            LEH.

(Dr, Yuusuf Dalal Cabdi)

Garsooraha  
Maxakmada Gobolka Hargeysa.

(Abokor Maxamed Axmed)

Kaaliyaha Maxakamada Gobolka Hargeysa